# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريـدة الرسميـة

Sannadka 15aad Muqdisho, 20 Juun 1987 Lambar 1 R 6

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

### QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 10 ee 11 Juun 1987 dhismaha diiwaanka Qaranka Hawlaha Guud iyo kawa gaarahaaneed BOG, 360

### QAYBTA LABAAD

### X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 21 ee 30 Maajo 1987, Magacaabid Nootaayo » 370

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH

### QAYBTA SADDEXAAD

DAWLADDA HOOSE MUQ. 12.3.85, Naado Dhul J le Maxamed Jumcaale Rooble L.145 » 371

QAYBTA KOOWAAD

# SHARCI

**SHARCI LAMBAR 10 ee 11 JUUN 1987 DHISMAHA DIIWAANKA QARANKA HAWLAHA GUUD IYO KUWA GAAR AHAANEED.**

M A D A X W E Y N A H A J D S

ISAGOO TIXGELINAAYA: oggolaashaha Gudduga joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA:

## QODOBKA 1AAD
## DIIWAANKA QARANKA

1) Waxaa Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guriyeyn-a laga abuuray diiwaanka Qaranka ee Konsoltannada, Sharikadaha iyo Qandaraaslayaasha Hawlaha Guud iyo kuwa gaar ahaaneed.

2) Diiwaangelintu waxay ku waajibeysaa cid kasta oo qabaneyso daraasadaha iyo dhismaha guud iyo kuwa Sharikadaha iyo Qandaraaslayaasha Hawlaha Guud iyo gaar ahaaneed ee laga fulinaayo Dalka gudihiisa iyadoo kuwa shisheeye loo raacayo nidaamka ku xusan faqradda b) ee Qod. 10aad iyo Qod. 20aad ee Sharcigan.

3) Hirgelinta Diiwaanka waxaa mas'uul ka ah Gud-qabaneyso daraasadaha iyo dhismaha guud iyo kuwa ha Guud iyo Guriyeynta oo xubnihiisa iyo hawlihiisu ku xusan yihiin Qod. 3aad ee Sharcigan.

## QODOBKA 2AAD
## KA QAYB GELID TARTAN

Tartammada hawlaha guud ee Dalka waxaa ka qayb geli kara oo keliya Sharikadaha, Qandaraaslayaasha iyo Hay'adaha ku qoran Diiwaanka Qaranka, marka laga reebo hawlaha u baahan takhasuska gaarka ah oo kuwa Diiwaanka ku qoran ayan qaban karin.

## QODOBKA 3AAD

radda Hawlaha Guud iyo Guriyeynta.

2) Shirarka iyo go'aanada Guddiga waxaa lagu qorayaa buugga shirarka iyadoo ay wada saxiixayaan xubnaha ka soo qayb galay shirka.

3) Buugga shirarka ma aha mid qarsoodi ah oo cid allaala ciddii dan ka leh ayaa baari karta, nuqulna weydiisan karta.

QODOBKA 4AAD

FADHIYADA IYO GO'AANADA GUDDIGA

1) Xubnaha Guddiga waxaa magacaabaya Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guriyeynta.

2) Fadhiga Guddigu wuxuu ku ansaxayaa marka ay ka soo qayb galaan ugu yaraan afar xubnood.

3) Go'aannada Guddigu waxay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah; haddii la noqdo barbarro waxaa aqlabiyadda leh dhinaca Guddoomiyuhu uu raaco.

4) Xubnaha Guddigu waxay yeelanayaan gunno fadhi oo lagu xaddidi doono Xeer uu soo saaro Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guriyeyntu, isagoo la tashaday Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

QODOBKA 5AAD

QAYBAHA IYO DARAJOOYINKA DIIWAANGELINTA

1) Diiwaangelintu waxay u kala baxdaa Qaybaha soo socda:

b) hawl dhismo;

t) dhismo jidad, buundooyin iyo kanaalada;

j) dhismaha dekadaha;

x) dhismaha iyo qodidda ceelasha biyaha;

kh) hawlaha korontada iyo wixii la xiriira

2) Qayb kastaa waxay u sii kala baxdaa darajooyinka soo socda marka la fiiriyo qiimaha qandaraaska:

b) qiimaha u dhexeeya Shs. 500.000 — Shs. 2.000.000
t) qiimaha u dhexeeya Shs. 2.000.001 — Shs. 5.000.000
j) qiimaha u dhexeeya Shs. 5.000.001 — Shs. 10.000.000
x) qiimaha u dhexeeya Shs. 10.000.001 — Shs. 30.000.000
kh) qiimaha ka badan Shs. 30.000.000

QODOBKA 6AAD

1) La diiwaangeliyaha waxaa lagu diiwaangelinayaa qaybaha iyo darajooyinka Guddigu u garto inuu ku habboon yahay

2) La diiwaangeliyaha waxaa lagu diiwaangelinayaa qayb kasta saddex darajo oo keliya, iyada oo isla markaana lagama maarmaan ay tahay in darajooyinkaas ay yihiin kuwo isku dhow.

## QODOBKA 7AAD
## CODSIGA DIIWAANGELINTA

1) Si diiwaanka loogu qoro, La-diiwaangeliyuhu wuxuu Guddiga u soo gudbinayaa codsi iyo warbixin ay ku tifaftiran yihiin Shuruudaha Sharciga tilmaamayo.

2) La-diiwaangeliyuhu waa in uu ku soo codsadaa qoraal gaar ah qayb kastaa asagoo caddeynaya darajada ama darajooyinka uu daneynaayo in lagu diiwaangeliyo.

3) Guddigu wuxuu weydiin karaa faahfaahin, sharraxaad, iyo qoraalladii kale ee uu u baahdo wuxuuna sameyn karaa hubin iyo baaris asagoo u xilsaaraya xubin ka mid ah Guddiga ama Hawlwadeen ka tirsan Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guriyeynta.

4) Guddigu waa inuu si degdeg ah go'aan uga gaaraa codsi kasta waana in la gaarsiiyaa codsadaha iyada oo loo sheegayo sababta go'aankaas.

## QODOBKA 8AAD
## ISBEDDELKA DIIWAANGELINTA

1) La-diiwaangeliyuhu wuxuu awood u leeyahay oo keliya inuu qabto hawlaha qaybahooda iyo darajooyinkooda uu ku diiwaangashan yahay. Marka la-diiwaangeliyuhu tartan ka qayb galo wuxuu soo gudbinayaa qoraallada diiwaangelinta oo waqtigoodu ka horreeyey hal bil.

2) La-diiwaangeliyuhu hadduu u qalmo waxaa loo oggolaan karaa, sanad kadib, darajooyinka kale ayada oo la raacayo faqradda labaad ee Qod. 6aad ee Sharcigan.

3) Haddii la-diiwaangeliyuhu u qalmi waayo ama ka bixi waayo darajada lagu diiwaangeliyey, Guddigu wu-

## QODOBKA 9AAD
## GAARSIIN QORAAL

Wax allaala wixii qoraal ah oo la gaarsiinayo la-diiwaangeliyaha oo ku saabsan fulinta qodobbada Sharcigan waxaa lagu gaarsiinayaa degaankiisa uu ku tilmaamay Muqdisho ama cinwaanka ugu qoran codsigiisa, haddii laba-da laga waayo, qoraallada waxaa loo dhigayaa Xoghaynta Guddiga.

## QODOBKA 10AAD
## SHURUUDAHA DIIWAANGELINTA

A) Shuruudaha Diiwaangelintu waa sida soo socota:

1) Waa in la-diiwaangeliyuhu yahay Soomaali;

2) Waa in la-diiwaangeliyuhu keenaa warqadda dembi la'aanta;

3) Waa in la-diiwaangeliyuhu caddeeyaa waayo-aragnimadiisa farsamo ee uu ku muujinaayo shahaaddooyin tacliineed iyo qoraallo la xiriira hawlo uu horay u qabtay, cidda uu u qabtay iyo qiimaha hawlahaas, isagoo muujinaaya qoraallo uu ka sito ciddii uu u fuliyey hawshaas;

4) Waa in la-diiwaangeliyuhu soo caddeeyaa awooddiisa dhaqaale, guurto, maguurto iyo macaamilkiisa bankiga, iyadoo Guddiga Diiwaangelintu si toos ah u baari karo qoraalladaas;

5) Waa in la-diiwaangeliyuhu soo caddeeyaa qalabka iyo alaabta farsamo ee uu hawsha ku qabanayo, isagoo ku soo lifaaqaya codsiga diiwaangelinta;

6) Waa in la-diiwaangeliyuhu soo caddeeyaa darajada uu rabo in lagu diiwaangeliyo;

7) Waa in la-diiwaangeliyuhu soo caddeeyaa haddii uu horey u diiwaangashanaa;

8) Waa in la-diiwaangeliyuhu soo caddeeyaa inaan canshuurta Dawladda lagu lahayn;

9) Waa in la-diiwaangeliyuhu soo caddeeyaa cinwaankiisa.

B) Soo caddeynta Soomaalinnimada oo ku xusan fac

i) Mashaariicda dibadda laga maalgeliyo;

ii) Mashaariicda u baahan aqoon gaar ahaaneed ee kuwa Dalka ka diiwaangashan ayan qaban karin oo Dawladdu u oggolaatay Konsoltannada, Sharikadaha ama Qanddaraalayaasha ajnabiga ah.

QODOBKA 11AAD
AWOODDA WASIIRKA

1) Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guriyeyntu, kaddib marka uu dhegeysto Guddiga Diiwaangelinat, waxaa uu soo saari karaa Xeer Wasiir oo uu ku qeexaayo tirada iyo aqoonta Shaqaalaha farsamo, tirada iyo tayada qalabka la diiwaangeliyaha looga baahan yahay qayb kasta iyo darajo kasta oo lagu diiwaangelinaayo.

2) Sidoo kale Wasiirku wuxuu soo saari karaa Xeer-hoosaad uu Guddiga Diiwaangelintu ku fulinaayo xilkiisa.

Qodobka 12aad
Caddeynta la-diiwaangeliyaha

1, La Diiwaangeliyeyaasha shakhsi ah shuruudaha ku xusan faqradda 1aad iyo 2aad ee qod, 10aad iyaga ayaa laga rabaa Sharikadaha Saamileeyda ah waxaa iaga rabaa shuruudahaas maamulayaasha ama maamulaha keliya ee idman kuwa shisheeyaha ahna waxaa laga rabaa shuruudahaas maamulaha wakiilka u ah sharikadda, sharikadaha kale waxaa laga doonayaa shuruudaha xubnaha oo dhan,

2, Shuruudahaas loogama baahno Hay,adaha Qaranka

Qodobka 13aad
Galka Diiiingelinta

1, La Diiwaangeliye kasta waxa uu leeyahay gal u aar ah oo loogu haayo codsigiisa diiwaangelinta, wixii falal ah oo la xiriira arrintaas iyo qoraalada ku xusan faqrada ha soo socda:

2, Maamule kasta oo loo qabta hawsha qandaraaska ee sharcigan ku xusan waa inuu u soo diraa Xoghayaha guud

la xiriira Qod, 10aad iyo Qod, 11aad ee Sharcigan,

Qodobka 14aad

Sababaha laali kara Diiwaangelinta

a) Waxaa Diiwaangelinta laali kara sababaha soo socda:

1, Oggolaansho heshiis looga hortagaayo caddeyn kicid,

2, Xukun Maxkamadeed oo aan kama dambeys ahayn oo la xiriira diidmo ku qorid diiwaanka si waafaqsan qod, 8aad ee Sharcigan,

3, Marka la hubiyo in ay jirto dadaal xumo ama fulin la'aan ama kala go' ku dhacda fulinta hawlaha qandaraaska lagu qaatay,

4, In la jebiyey shuruudaha u degsan maalgelinta shisheeye iyo maamul xumo culus ee ku saabsan shuruudaha Nabadgeliyada iyo daryeelka Shaqaalaha,

5, Fulin la'aan waajibaadka ku xusan faqradda 3aad ee qod, 13aad ee Sharcigan,

b) Laalidda diiwaangelinta ee ku xusan lambarka 4aad iyo lambarka 5aad waa inaysan ka yaraan laba bilood kana badnaan hal sano.

Qodobka 15aad

Sababaha ka tirtiridda diiwaanka

Waxaa Diiwaanka la isaga tirtiri karaa sababaha soo socda:

1, ku dhawaaqid kicid,

2, Xukun Maxkamadeed kama dambeys ah oo la xiriira diidmo ku qorid Diiwaanka oo waafaqsan qod, 8aad ee Sharcigan,

3, Marka la hubiyo in ay jirto khayaano, dadaal xumo iyo gefaf culus oo la xiriira fulinta hawlaha qandaraaska lagu qaatay,

, Ka waantoobi la'aanta dembiyada ku xusan Lam, 3, 4 iyo 5 ee qodobka hore,

5, Ka soo bixid la'aanta shuruudihii saldhigga u ahaa Diiwaangelinta ama haddii la hubiyo in diiwaangelinta lagu helay been abuur,

1, Marka laga reebo arrimaha ku xusan faqradaha laad ee labaad qodob ee hore laalidda iyo ka tirtiridda diiwaanka waxaa ku dhawaaqaya Guddiga, kaddib marka uu hubiyo runta qoraalada, waana inay si qoraal ah ugu gudbi yaan la diiwaangeliyaha,

2, Guddigu intuusan ku dhawaaqin go'aanka hore, Waa inuu u gudbiyaa la diiwaangeliyana qoraallada la xiriira sababana laalidda ama ka tirtiridda, La Diiwaangeliyu hu waa inuu ku keeno jawaabdiisa muddo 15 maalmood gu dahooda ah, muddadaas kaddib guddigu wuxuu soo saari ka raa go'aankiisa,

3, La Diiwaangeliyeyaasha laga tirtiro diiwaanka cod si cusub ma keensan karaan muddo Saddex Sano ah,

### Qodobka 17aad
### Kharajka Diiwaangelinta

La Diiwaangeliyuhu wuxuu bixinayaa sannad kasta kharajka diiwaangelinta oo ah sida soo socota,

b) sh,so, 10,000/= heerka sh,so, 500,000 ilaash,so 2,000,000,

t) sh,so, 20,000/ heerka shs, 2,000,001 ilaa sh,so 10,000,000

j) sh,so, 50,000/ heerka sh,so, 10,000,001 iyo Wxiij ka badan

x) sh,so, 100,000/ Shariikadaha Ajnabiga ah,

### Qodobka 18aad
### BixintaKharajka Diiwaangelinta

1, La Diiwaangeliye kasta waa inuu u keenaa guddiga Diiwaangelinta caddeyn inuu bixiyey kharajka diiwaangelinta Sannadka soo socda intaan bisha sannadka ugu horey sa dhammaanin,

2, La diiwaangeliye kasta waxaa la siinayaa caddeyn soconeysa hal sano oo uu bixiyey kharajka diiwaangelinta

ee ku tilmaaman Qod. 17aad ee sharcigan.

3. La diiwaangeliyaha bixin waaya kharajka ku xusan Qod. 17aad waxaa laga laalayaa ku qornaashada diiwaanka.

Qod. 19

Khasiraad

1. Guddiga Diiwaangelintu waxay awood u leeyihiin in ay ku khasiraan lacag dhan Sh.So. 100.000/= ilaa Sh.So 500.000/= cid kasta oo ku xadgudubta Qodobada Sharcigan dhigaayo, haddii xadgudubkaasi uusan keeneynin ka laalid, ka tirtirid diiwaanka ama dembi Maxkamad ku shaqo leedahay.

2. Qofkii Guddiga Diiwaangelintu khasiro wuxuu cabasho u qoran karaa muddo 15 maalmood gudahood, laga billaabo taariikhda go'aanka khasiraadda gacanta laga saaro, Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guriyeynta oo yeelanayo go'aanka kama dambeysta ah.

Qandaraaslayaasha iyo Konsaltannada qalaad

Qod. 20

1. Qandaraaslayaasha iyo Konsoltanada, qalaad ee la dii waangeliyo waxaa loo sameynayaa diiwaangelin meel ku gaar ah oo caddeyneysa muddada uu dalka joogaayo iyo wixii kale oo caddeyn ah.

2. Diiwaanka waa laga tirtirayaa markii muddada la diiwaangeliyey dhammaato, haddii aan la helin sabab waqtiga loogu kordhiyo.

Qod. 21

Qiimeeynta tartammada

Iyadoo mar waliba la raacayo shuruucda tilmaamaya habka bixinta qandaraasyada Hawlaha Guud, waxaa Wasaaraddda iyo Wakiiladeeda Gobollada yeelanayaan awoodda qiimeynta tartammada shareigan ku xusan haddii Hey'ad kale aysan laheyn sharci ahaan awooddaas.

Qod. 22
Baabi'in

Waxaa la baabi'iyey Sharciga 71 ee 22 Nofember 1970 «Diiwaanka Qaranka ee Qandaraaslayaasha» iyo sharci kasta oo ka hor imaanaaya ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 23
Dhaqan gelid

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 11 Jun 1987

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)